

# Diiratada Qodxaha leh (Browntail Moth Caterpillars)


Xaashida xaqiiqada



Diirada qodxaha leh waxay leedahay timo yaryar oo sun ah oo keeni kara xayaasiyada jirka oo lamid ah tan sunta ivy iyo ciladaha kale oo dheeraadka ah oo daran.

Diirada qodxaha leh waxay dheerar le'eg tahay 1.5 inji midabkeeduna waa baroon leh dalimo ku yaala labada gees iyo labo barood oo cas/oranji ah oo saynta danbe uga yaala.

Sawir lagasoo xigtay Adeegga Kaymaha ee Maine




Diiratada qodxaha leh waxay aad u kacsan tahay bartamaha Abriil ilaa biloowga Oktoobar. Timaha ayaa wali ah kuwo sun ah muddo ilaa tobansano ah.

## Astaamaha iyo Calaamadaha



Finanka Maqaarka



Neefsiga iyo ciladaha kale ee neef mareenka

Taabashada tooska ah ee timaha ayaa keeni kara finanka maqaarka oo socon kara dhawr saacadood ilaa dhawr maalmood. Finanka ayaa noqon kara kuwo cas, soo buuran, oo cuncun leh. Dadka qaar ayaa qabi kara qaab gaar ah oo daran oo finan ah oo socon kara dhawr asbuuc. Mararka qaar, timaha ayaa qofku uurka u neefsan karaa waxayna abuuri karaan cilado dhanka neefsiga ah. Finanku iskagama dhex faafaan dadka.



Malahan daawo gaar u ah finanka ka dasha diiratada qodxaha leh. Daaweynta guriga qaar ayaa kaa caawin kara yaraynta xanuunka. Tan waxaa ku jiri kara inaad ku qubaysato biyo qaboow oo leh baking soda, kareenka hydrocortisone, iyo kareenka calamine. Haddii aad dhib ku qabto neefsiga, wax liqida, ama uu ku bararo afka, carabka, ama dhuunta, wac 9-1-1.


# Kahortagga



Biyo qaboow ku qubayso kadibna badal dharka aad qabtay markay diiratada qodxaha leh ku soo gaartay iskana dhaq tin kasta oo kaasoo raacay.



Xiro maaskaro, ookiyaalo waawayn, iyo gafuur xir marka aad samaynayso shaqo kasta oo kicin karta timaha diiratada qodxaha leh, sida caleemaha geedaha.




Ku qalaji dharka gudaha inta lagu jiro bilaha Juun iyo Luuliyo si aad uga difaacdo in timaha diiratada qodxaha leh soo raacaan dharka.



Samee shaqada fagaaga iyo geedo gaabinta maalmaha roobku da'aayo si aysan timaha diiratada qodxaha leh kuugu bidin.

## Xakamayn



Xaaq shabaqyada diiratada qodxaha leh xiliyada jiilaalka iyo biloowga hore ee gu'ga




Hoos u dhig meelaha leh diiratada kadibna ku afuuf afuufaha HEPA.



Shaqaalaysii khabiirka cayayaanka/buufinta cayayaanka

Kadibna markaad jarto shabaqyada, burburi adoo ku qoynaaya biyo saabuun leh. Qof u shaqaalaysii inuu geedaha suntu gaartay uu daaweyo kahor dhammaadka Maayo si looga hortago abuurmidha timaha sunta ah. Isticmaalka sunta cayayaanka meel 250 fiid uga dhow bada lama ogola.

## Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. [www.maine.gov/dhhs/brownetailmoth](http://www.maine.gov/dhhs/brownetailmoth) (ayna ku jiraan su'aalaha Inta badan la Isweydiyo)
2. [www.maine.gov/dacf/mfs/forest\\_health/invasive\\_threats/browntail\\_moth\\_info.htm](http://www.maine.gov/dacf/mfs/forest_health/invasive_threats/browntail_moth_info.htm) (waxaa ku jira qariirada meelaha khatarta ugu jira dhawra xaniyada)

Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa 211 Maine adoo wacaaya 211, ciwaanka gurigaaga u diraaya 898-211, ama iimeel u diraaya [info@211maine.org](mailto:info@211maine.org) si aad u hesho xog dheeraad ah.